



# USCIS Waxay Soo Dhaweyneysaa Qaxootiga iyo Magangalyo- doonka



U.S. Citizenship  
and Immigration  
Services

M-1186-SOM (7/20)



**USCIS**  
**Waxay Soo**  
**Dhaweyneysaa**  
**Qaxootiga iyo**  
**Magangalyo-**  
**doonka**



**U.S. Citizenship  
and Immigration  
Services**

# USCIS Waxay Soo Dhaweyneysaa Qaxootiga iyo Magangalyo-doonka

Adeegyada Muwaadinimada iyo Socdaalka Mareykanka (USCIS), oo qeyb ka ah Waaxda Amniga Gudaha ee Mareykanka (DHS), ayaa kuugu soo dhaweyneysa Mareykanka qaxooti ahaan ama magangalyo-doon ahaan. Waxa aan qiimeyneynaa xirfadahaaga iyo hibooyinkaaga, waxaan dooneynaa inaan kugu caawino sidii aad ula qabsan lahayd bulshadaada oo aad ugu guuleysan laheyd noloshada Mareykanka. Waxaan kaloo aan rabnaa inaan wadaagno macluumaadka ku saabsan sidaad u noqon karto muwaadin Mareykan ah.

Buugan-yar wuxuu kaa caawin doonaa inaad wax ka baratid degitaanka Mareykanka iyo xuquuqda, waajibaadka, iyo muhiimada dhalashada Mareykanka. Noqoshada muwaadin Mareykan ah waxay ku siineysaa xuquuq la mid ah tan uu leeyihiin dadka Mareykanka oo dhan waxaanay dhistaa dareen ah wada lahaanshaha adiga iyo muwaaddiniintaada kale.



# Xuquuqaha iyo Mas'uuliyadaha

Qaxooti ahaan ama magangalyo-doon ahaan ku nool Mareykanka, waxaad leedahay xuquuqo badan, sida dadka kale ee halkan ku nool. Xuquuqahan qaarkood waxaa ka mid ah xorriyadda hadalka, xorriyadda diinta, iyo xorriyadda kulanka.

Waxa kale oo aad leedahay mas'uuliyado. Dalka Mareykanka, qof walba waa inuu raaca sharciga. Waxaad u baahan tahay inaad fahanto sharciga Mareykanka maxaa yeelay way ka duwanaan karaan sharciyada meelaha kale ee aad ku nooleyd. Wax ka barashada taariikhda Mareykanka, dawladda, iyo dhaqanka waxay kaa caawin doontaa inaad dareento inay tahay hoygaaga.

## **Waxaad xaq u leedahay inaad:**

- Ku noolaato meel kasta oo dalka Mareykanka ah
- Ka shaqeyso Mareykanka
- Ka baxdo oo kusoo noqoto Mareykanka iyadoo la raacayo shuruudo gaar ah
- Dhigato dugsigu dadweynaha ilaa da'da gaara, sida ku xusan qawaaniinta gobolka
- Codsato kaarka Lambarka Bulshada ee aan xadidnayn (loo yaqaan shooshal sekuriti)
- Codsato laysanka darawalka ama nooc kale oo aqoonsi dowladeed ee dowlad-goboleedkaaga ama deegaankaaga
- Codsato inaad noqoto degane rasmi ah oo sharci ah iyo muwaadin Mareykan ah marka aad xaq u yeelato

- Codsato in saygaaga/xaaskaaga ama carruurta aan guursan ay helaan magangalyo ama xaalad asal ahaan qaxooti ah ay ku noolaadaan Mareykanka
- U warbixiso dembiyada ama xadgudubka sharci fulinta oo aad hesho kaalmadooda

### **Waxaad leedahay mas'uuliyad waxaana lagaaga baahan yahay:**

- Codsato oggolaanshaha aad ugu laabanayso Mareykanka ka hor intaadan dhoofin adigoo ka dalbanaya dukumentiga socdaalka qaxootiga, xitaa haddii aad tahay qof magangalyo-doon ah
- Aad raddid dhammaan sharciyada federaalka, gobolka, iyo degmada
- Bixiso canshuurta federaalka, gobolka, iyo degmada, haddii lagugu dabaqi karo
- Iska diiwaangeliso Adeegga Xulashada ah haddii aad lab tahay inta u dhaxaysa 18 iyo 26 sano
- U sheegto USCIS cinwaankaaga cusub ugu dambeyn 10 maalmood ka dib guuritaankaaga
- U dirto carruurtaada dugsiga
- Codsato sharciga deganaanshaha rasmiga ah kadib marka aad 1 sano Mareykanka joogtid haddii aad qaxooti tahay

## **Degitaanka Mareykanka**

Wadanka Mareykanka, heer kasta oo dowladeed waxay ka ciyaaraysaa kaalin ka geddisan sidii lagu dejin lahaa. Waad la xiriiri kartaa xafiisyada dowladda hoose, gobolka, iyo dowladda dhexe inta lagu gudajiro hanaankaaga dejinta.



La xiriir isu-duwahaaga qaxootiga ee gobolka, isu-duwaha caafimaadka qaxootiga ee gobolka, hay'adda dib-u-dejinta ama hay'ad ku saleysan bulshada oo la shaqeysa soo-galootiga si ay kaaga caawiso u tilmaamida barnaamijka caawimadda ee dowladda. Barnaamijyo badan oo caawimo dowladeed ah ayaa leh waqtiyo xaddidan oo u qalimid kuwaas oo ka bilaabma taariikhda lagu siiyay magangalyada ama qaxooti ahaan lagu aqbalay.

Haddii aad u baahan tahay caawimo xagga barashada Ingiriisiga ah, waxaad isqori kartaa fasalka Ingiriisiga. Ka hubi hay'addaada dib-u-dejinta, maktabadda dadweynaha, hay'adda adeegga bulshada, ama goobta cibaadada si aad u hesho macluumaad ku saabsan fasallada Ingiriisiga iyo xiisadaha iyo adeegyada kale.

## **Tallaabooyinka Xiga ee Hanaankaaga Socdaalka**

Haddii aad ku soo gashay Mareykanka qaxooti ahaan 2-dii sanno ee la soo dhaafay ama lagu siiyay magangalyo labadii sano ee la soo dhaafay, waxaad ka codsan kartaa xubnaha qoyska qaarkood inay halkan kuugu imaadaan. Waxaad codsan kartaa xubnaha qoyska ee soo socda:

- Lammaanaha

- Ilmo (aan guursan iyo ka yar 21 sanno markii ugu horeysay ee aad magangalyada ama qaxootinimada codsatay)

Waa inaad u gudbisaa Foomka I-730, Codsiga Qaraabada Qaxootiga/Magangalyo-doonka, USCIS 2 sanno gudahood marka lagu siiyo magangalyo ama lagu qaabilo qaxooti ahaan, ama aad muujiso sababa bini'aadanimada si laguugu dheereeyo muddada 2-da sanno ah. Foomkan waxaa laga heli karaa [uscis.gov/i-730](https://uscis.gov/i-730).

## Deganaanshaha Joogtada ah ee Sharciga ah

Deganaanshaha joogtada ah ee sharciga ah (Haystaha Kaarka Cagaaran) waa qof loo oggolaaday inuu ku noolaado kana shaqeeyo Mareykanka si joogto ah. Sida caddeyn u ah heerkaas, qofka waxaa la siiyaa Kaarka Deganaanshaha Joogtada ah, oo caadi ahaan loo yaqaan Kaarka Cagaaran. Helitaanka Kaarka Cagaaran wuxuu kaloo dhigayaa mid wadada loo maro kartida lagu dalbado dhalashada buuxda ee Mareykanka (inbadan oo ku saabsan hoos ayay ku qoran tahay).

- Qaxootigu **waa** inay dalbadaan Kaadhka Deganaanshaha Joogtada ah 1 sanno kadib imaatinka Mareykanka. Qaxootiga waa inay haystaan 1 sanno joogitaanka dalka Mareykanka ah waqtiga ay xareynayaan arjiga.
- Magangalyo-doonka **ayaa** dalban kara Kaadhka Deganaanshaha Joogtada ah 1 sanno kadib markii la siiyay



magangalyada. Magangalyo-doonku waa inay haystaan 1 sanno joogitaanka dalka Mareykanka ah waqtiga ay xareynayaan arjiga.

Si aad u dalbato sharci deganaansho rasmi ah oo sharci ah oo aad u hesho Kaadhka Deganaanshaha Joogtada ah, xareyso Foomka I-485, Codsiga Diiwaangelinta Deganaanshaha Joogtada ah ama Beddelida Xaaladda. Foomkan waxaa laga heli karaa [uscis.gov/i-485](https://uscis.gov/i-485). Inkasta oo ay jirto lacag khidmad ah oo ay dadka magangal-doonka ah u buuxiyaan Foomka I-485, ma jiraan wax khidmad ah oo loogu talagalay qaxootiga inay xareyaan Foomka I-485. Ururada bulshada ku saleysan, oo ay ka mid tahay hay'ada dib-u-dejinta ee deegaankaaga, ayaa kaa caawin karta hawshan.

## Qaxootiga

Haddii aad qaxooti tahay, waxaa sharci ahaan lagaa doonayaa inaad dalbato sharciga deganaanshaha rasmiga ah 1 sanno kadib markii lagu aqbalay qaxooti ahaan Mareykanka.

### **Codso deganaansho rasmi ah oo sharci ah**

Xareyso Foomka I-485, Codsiga Diiwaangelinta Deganaanshaha Joogtada ah ama Beddelida Xaaladda. Qaxootigu ma bixiyaan khidmad si ay u xareystaan Foomka I-485 ama adeegyada xog keydinta.

Waxaad xaq u leedahay inaad codsatid haddii:

- Aad jir ahaan joogtay dalka Mareykanka ugu yaraan 1 sanno kadib markii qaxooti ahaan lagu aqbalay;
- Aad jir ahaan joogtid dalka Mareykanka waqtiga aad xereysid Foomka I-485;
- Lagaa oggolaan karo dalka Mareykanka soo-galooti ahaan; iyo
- Aan hore laagala noqon xaaladaada qaxooti ahaan.

Booqo [uscis.gov/i-485](https://uscis.gov/i-485) iyo [uscis.gov/greencard/refugees](https://uscis.gov/greencard/refugees) si aad u hesho macluumaad dheeraad ah.

### **Codso dhalashada Mareykanka**

Waad u qalmi kartaa dhalashada haddii aad heysatay deganaansho rasmi ah oo sharci ah dhowr sano oo aad buuxisay dhammaan shuruudaha u qalmida. Fadlan booqo [uscis.gov/citizenship](https://uscis.gov/citizenship) si aad u hesho macluumaad dheeraad ah.

## Magangalyo-doonka

Haddii aad tahay qof magangalyo doon ah, waxaad xaq u leedahay inaad dalbato sharci deganaansho oo rasmi ah 1 sanno kadib markii lagu siiyay magangalyada haddii aad sii deganaatay guriga waqtiga oo dhan, laakiin qasab kuguma aha inaad codsatid.

### **Codso deganaansho rasmi ah oo sharci ah**

Xareyso Foomka I-485, Codsiga Diiwaangelinta Deganaanshaha Joogtada ah ama Beddelida Xaaladda, oo bixi khidmadaha gudbinta iyo adeegyada xog keydinta.

Waxaad xaq u leedahay inaad codsatid haddii:

- Aad jir ahaan joogtay dalka Mareykanka ugu yaraan 1 sano kadib markii magangalyada lagu siiyay;
- Aad jir ahaan joogtid dalka Mareykanka waqtiga aad xereysid Foomka I-485;
- Sii wadid inaad la kulanto qeexitaanka qaxootiga ama aad tahay xaas ama cunuga qaxooti;
- Aan si rasmi ah dib laguugu dejin waddan shisheeye ah;
- Lagaa oggolaan karo dalka Mareykanka soo-galooti ahaan; iyo
- Aan hore laagala noqon xaaladaada magangalyo-doon ahaan.

Booqo [uscis.gov/i-485](https://uscis.gov/i-485) iyo [uscis.gov/greencard/asylees](https://uscis.gov/greencard/asylees) si aad u hesho macluumaad dheeraad ah.

### **Codso dhalashada Mareykanka**

Waad u qalmi kartaa dhalashada haddii aad heysatay deganaansho rasmi ah oo sharci ah dhowr sano oo aad buuxisay dhammaan shuruudaha u qalmida. Fadlan booqo [uscis.gov/citizenship](https://uscis.gov/citizenship) si aad u hesho macluumaad dheeraad ah.

## **Dhalashada (Muwaadinimada)**

Dhalashada ayaa ah taxanaha guud ee isku xira dhamaan dadka Mareykanka ah. Waxaan nahay qaran aan ku xidhnayn isir ama diin laakiin waxaan ku mideysan nahay qiimayaasha la wadaago ee xorriyadda, madax-banaanida, iyo sinnaanta. Marka aad noqoto muwaadin Mareykan ah, waxaad cod ku yeelan doontaa sida qarankeena loo xukumo.

Akhlaaqdaada adigoo ah degane rasmi ah oo sharci ah waxay saameyn ku yeelan kartaa awooda aad ku hesho dhalashada Mareykanka marka dambe. Hanaanka noqoshada muwaadin Mareykan ah waxaa lagu magacaabaa qaadashada dhalashada. Waa inaad ka soo baxdid dhammaan shuruudaha u-qalmitaanka si aad u noqoto muwaadin Mareykan ah.

Guud ahaan, dhowr sanno oo deganaanshaha rasmiga ah ee sharciga ah kadib, waxaad dalban kartaa dhalashada. Qaxootiga iyo magangalyo-doonka ayaa codsan kara dhalashada 5 sanno kadib taariikhda loo oggolaaday degganaanshaha rasmiga ah ee sharciga ah. Magangalyo-doonka waxa laga dhigaa deganaha rasmiga ah ee sharciga ah taariikhda 1 sanno kahor ansaxinta Foomkooda I-485. Markii la oggolaado Foomkooda I-485, qaxootiga waxaa loo oggolaadaa degganaansho rasmi ah oo sharci ah laga bilaabo taariikhda imaatinkooda Mareykanka.



Si aad u hesho liiska dhammaan shuruudaha u qalmitaanka dhalashada, booqo [uscis.gov/citizenship](https://uscis.gov/citizenship). Shuruudaha qaar waxa ka mid ah waxyaabaha soo socda:

- Waxaad u baahan tahay inaad jir ahaan joogtid dalka Mareykanka waqti go'an.
- Waxaad u baahan tahay inaad deganaansho joogto ah ku lahaato Mareykanka.
- Waxaad u baahantahay inaad lahaato akhlaaq wanaagsan.
- Waxaad u baahan tahay inaad ku hadasho, akhriso, qorto, oo aad fahamto Ingiriisiga aasaasiga ah iyo inaad fahamto taariikhda Mareykanka iyo dowladda (bulshada rayidka ah).
- Waxaad u baahantahay inaad taageerto mabaadii'da iyo fikradaha dastuurka Mareykanka oo aad diyaar u tahay inaad dhaarasho daacadnimo u gasho Mareykanka.

Si aad u dalbato dhalashada, xareyso Foomka N-400, Codsiga Dhalashada, ee laga heli karo onlaynka [uscis.gov/n-400](https://uscis.gov/n-400). Waxa kale oo aad ku bixin kartaa onlayn khidmahaaga Foomka N-400 iyo xog keydinta. Waxa jira waxyaabo laga reebayo

iyo wax ka beddel lagu sameeyo shuruudaha dhalashada oo loogu talagalay kuwa u qalma. USCIS waxay kale oo ay qaabilaad siisaa dadka naafada ah. Ururo badan oo bulshada ah, sida wakaaladaha dib-u-dejinta ee deegaanka, ayaa kaa caawin kara inaad u diyaargarowdo qaadashada dhalashada.



Munaafacaadka, xuquuqaha, iyo waajibaadka qaarkood ayaa la socda dhalashada Mareykanka, oo ay ku jirto awoodda codbixinta doorashooyinka federaalka, u adeegidda xeerbeegtida, ku safrida baasaboorka Mareykanka, u tartamida shaqooyinka dowladda dhexe, iyo noqoshada sarkaal lasoo doortay.

# La Xiriir USCIS

Booqo [uscis.gov](https://uscis.gov) wixii macluumaad dheeri ah, si aad u hubiso xaaladda kiiskaaga, ama aad u hesho xafiis USCIS. Waxaad wici kartaa USCIS taleefanka bilaashka ah 800-375-5283. Dadka dhagaha la', maqalkoodu culus yahay ama naafo ka ah hadalka, wac TTY 800-767-1833. Adeegga waxa lagu heli karaa Ingiriisi iyo Isbaanish. Sidoo kale waxaad booqan kartaa [uscis.gov/contactcenter](https://uscis.gov/contactcenter), ee Xarunta Xiriirka ee USCIS.

## Ilaha USCIS

### **Adeegyada Muwaadinimada iyo Socdaalka Mareykanka (USCIS)**

USCIS waxay dusha kala socotaa socdaalka sharciga ah ee Mareykanka. Baro sida loo dalbado Kaadhkaaga Cagaaran, loo qaato dhalashada Mareykanka, dib loola midoobo qoyska, loo helo oggolaansho aad ugu safarto dibedda, iyo in badan oo kale.

Ilaha loogu talagalay qaxootiga iyo magangalyo-doonka

[uscis.gov/howdoi/refugeesasylees](https://uscis.gov/howdoi/refugeesasylees)

### **Ku soo dhawow Mareykanka: Hagaha Loogu Talagalay Soo-galootiga Cusub**

Hagahani wuxuu soo bandhigayaa macluumaadka aasaasiga ah ee adiga iyo qoyskaaga aad ugu baahan tihiin nolol maalmeedka Mareykanka. Wuxuu sharaxayaa xuquuqahaaga iyo waajibaadkaaga, waxay soo jeedineysaa fikradaha ka qeybgalka bulshada deegaankaaga, wuxuuna kaa caawiniyaa inaad qorsheyso codsashada dhalashada Mareykanka marka aad noqoto degane rasmi ah oo sharci ah.

[uscis.gov/newimmigrants](https://uscis.gov/newimmigrants)

## Ilaha USCIS

### **Degida Mareykanka**

Boggan internetku wuxuu ku siinayaa macluumaad ku saabsan Mareykanka, waxbarashada iyo daryeelka carruurta, xaaladaha degdegga ah iyo nabadgelyada, u safridda dibedda Mareykanka, shaqada, degitaanka Mareykanka, munaafacaadka dowladda, daryeelka caafimaadka, iyo lacagta iyo dhaqaalaha.

[uscis.gov/tools/settling-us](https://uscis.gov/tools/settling-us)

### **Xarunta Ilaha Muwaadinka**

Boggan internetka waxaa laga helaa qalab waxbarasho iyo macluumaad ah oo kaa caawinaya inaad isu diyaarisid dhalashada Mareykanka.

[uscis.gov/citizenship](https://uscis.gov/citizenship)

### **Ka Fogow Khiyaanooyinka**

Haddii aad u baahan tahay tallo sharci oo ku saabsan arrimaha soo-galootiga, hubi in qofka ku caawinaaya uu awood u leeyahay inuu bixiyo tallo sharci. Kaliya qareen ama wakiil la aqoonsan yahay oo u shaqeeya hay'ad ay aqoonsan tahay Waaxda Caddaaladda Mareykanka ayaa ku siin kara tallo sharci.

[uscis.gov/avoid-scams](https://uscis.gov/avoid-scams)

[uscis.gov/avoid-scams/find-legal-services](https://uscis.gov/avoid-scams/find-legal-services)



## Ilaha USCIS

### Foomamka

Adeegso **Foomka I-765** si aad u dalbato oggolaanshaha shaqada, dib u cusboonaysiiso oggolaanshahaaga, ama aad u beddesho dukumintigaaga.

[uscis.gov/i-765](https://uscis.gov/i-765)

Adeegso **Foomka I-730** si aad u keento xaaskaaga/seygaaga ama careuurtaada Mareykanka.

[uscis.gov/i-730](https://uscis.gov/i-730)

Adeegso **Foomka I-131** si aad u codsato oggolaansho si aad ugu laabato Mareykanka adigoo helaya dukumintiga safarka qaxootiga.

[uscis.gov/i-131](https://uscis.gov/i-131)

Adeegso **Foomka I-485** si aad u codsato sharci deganaansho oo rasmi ah haddii aad joogtid Mareykanka.

[uscis.gov/i-485](https://uscis.gov/i-485)

Adeegso **Foomka N-400** si aad u codsato dhalashada Mareykanka.

[uscis.gov/n-400](https://uscis.gov/n-400)

Adeegso **Foomka AR-11** si aad u hubiso in cinwaankaaga lagu cusboonaysiiyo USCIS.

[uscis.gov/ar-11](https://uscis.gov/ar-11)

### myUSCIS

Raadi macluumaad cusub oo ku saabsan habka loo codsado ee munaafacaadka socdaalka, qalabka kaa caawinaya inaad u diyaar garowdo qaadashada dhalashada, iyo ilaha aad ku heli karto xiisadaha u diyaargarowga dhalashada iyo dhakhaatiirta bulshadaada. Baro sida loo xareysto arjiga ama looga codsado onlaynka iyo helitaanka macluumaadka ku saabsan kiiskaaga adigoo iska diiwaangelinaya koontada onlaynka ah.

[my.uscis.gov](https://my.uscis.gov)

[myaccount.uscis.dhs.gov](https://myaccount.uscis.dhs.gov)

## Ilaha kale ee Federaalka

Shaxdan soo socota ayaa bixinaysa macluumaad dheeri ah oo ku saabsan adeegyada dowladda federaalka ee loogu talagalay qaxootiga iyo magangalyo-doonka.

### Ilaha Dowladda Federaalka

#### **Waaxda Caafimaadka iyo Adeegyada Aadanaha ee Mareykanka Maamulka Carruurta iyo Qoysaska Xafiiska Dib u Dejinta Qaxootiga (ORR)**

Haddii aad tahay qaxooti, magangalyo-doon, iyo xubin reerka ka soo jeeda, waxaad xaq u yeelan kartaa inaad ka hesho kaalmo iyo adeegyo ORR. Hay'adda ORR waxay maalgelisaa oo maamushaa barnaamijyo kala duwan oo ay ku jiraan lacag kaash ah iyo caawimada caafimaad, diyaarinta shaqaaleysiinta, meelaynta shaqo, iyo tababarka luqadda Ingiriisiga. Inbadan oo kamid ah barnaamijyadan waxay leeyihiin u qalimid waqti xadidan oo ka bilaabmaysa taariikhda lagu siiyay magangalyada ama aad ku soo gashay Mareykanka qaxooti ahaan. ***Waa inaad sahamisaa haddii aad u qalanto mid kamid ah barnaamijyadan sida ugu dhaqsaha badan haddii aad xiiseyneyso midkood.***

#### **Isu-duwayaasha qaxootiga gobolka/ isu-duwayaasha caafimaadka qaxootiga gobolka**

[acf.hhs.gov/orr/resource/orr-funded-programs-key-contacts](https://acf.hhs.gov/orr/resource/orr-funded-programs-key-contacts)

#### **Barnaamijyada iyo ilaha gobolka**

[acf.hhs.gov/orr/state-programs-annual-overview](https://acf.hhs.gov/orr/state-programs-annual-overview)

#### **Ilaha ceymiska caafimaadka**

[acf.hhs.gov/orr/health](https://acf.hhs.gov/orr/health)

#### **Ilaha guryaha la awoodi karo**

[acf.hhs.gov/orr/resource/finding-affordable-housing](https://acf.hhs.gov/orr/resource/finding-affordable-housing)

#### **Ilaha shaqaaleysiinta**

[acf.hhs.gov/orr/employment-resources](https://acf.hhs.gov/orr/employment-resources)

## Ilaha Dowladda Federaalka

### **Waaxda Arimaha Dibedda Mareykanka Xafiiska Dadka, Qaxootiga, iyo Socdaalka Barnaamijka Soo dhaweynta iyo Meelaynta**

Haddii lagu oggolaaday qaxootinimada Mareykanka, waxaa ku maalgeliyey hay'ad dib-u-dejin oo ka qeybqaadata Barnaamijka Soo-dhoweynta iyo Meelaynta, oo ay maamusho Waaxda Arrimaha Dibedda Mareykanka. Hay'adda kafaala qaadda ayaa mas'uul ka ah inay kugu meelayso mid ka mid ah xafiisyadeeda maxalliga ah iyo bixinta adeegyada bilowga ah, sida guriyeynta, qalabka aasaasiga ah, cuntada, dharka, hagida iyo kaalmaynta helitaanka adeegyada kale ee bulshada, caafimaadka, iyo shaqooyinka inta lagu jiro 30 ilaa 90-kaaga maalmood ee ugu horeeya dalka Mareykanka. **Markii ugu horreysay ee aad qaxooti ahaan ku timaadid Mareykanka, hay'adda dib-u-dejinta ee deegaankaaga ayaa noqon doonta meesha ugu horreysa ee aad u jeedsan lahayd si laagaga caawiyo dejintaada.**

[state.gov/refugee-admissions/reception-and-placement](https://state.gov/refugee-admissions/reception-and-placement)

### **Waaxda Arimaha Dibedda Mareykanka Xafiiska Dadka, Qaxootiga, iyo Socdaalka Beddelka Kheyraadka Hagida Dhaqanka (CORE)**

Waxaa maalgeliyey Waaxda Arrimaha Dibedda ee Mareykanka, CORE waxay siisaa ilo badan oo hagd dhaqameed ah qaxootiga ku socda Mareykanka. Bogga internetka waxaa ku jira agab ku qoran luqado ay ka mid yihiin Carabi, Farsi, Kinyarwanda, Kiswahili, iyo Soomaali. CORE waxay kaa caawin doontaa inaad dhaqankaaga ku jiheysato Mareykanka. **Hadda baar CORE si aad waxbadan uga ogaatid shaqada, guriyeynta, daryeelka caafimaadka, maamulka lacagta, iyo inbadan oo kale si ay kaaga caawiso inaad la qabsato noloshu Mareykanka.**

[corenav.org](https://corenav.org)

## Ilaha Dowladda Federaalka

### Waaxda Shaqaalaha Mareykanka (DOL)

DOL waxay kobcisaa, dallacdaa, isla markaana horumarisaa daryeelka dadka shaqeeya ee mushaharka qaata, kuwa shaqo doonka ah, iyo kuwa hawlgabay ee Mareykanka; waxay ka shaqeysaa sidii loo hormarin lahaa fursadaha shaqo helis faa'iido leh; wuxuuna hubiyaa waxtarka iyo xuquuqaha shaqada la xiriira.

***Hoos ka fiiri [careeronestop.org](https://www.careeronestop.org). Waxay kaa caawin kartaa inaad shaqooyin iyo tababar ka hesho bulshadaada dhexdeeda.***

### Ilaha Xuquuqda Shaqaalaha

[dol.gov](https://dol.gov)

### Xarumaha Shaqada ee Mareykanka (oo ay maalgalisay DOL)

[careeronestop.org](https://www.careeronestop.org)

877-US2-JOBS (877-889-5627 (TTY))

### Waaxda Caddaaladda Mareykanka Soo-galootiga iyo Qeybta Xuquuqda Shaqaalaha

Qaybta Soo-galootiga iyo Xuquuqda Shaqaalaha ee Waaxda Caddaaladda Mareykanka waxay xoojineysaa bixinta aan takoorka lahayn ee Sharciga Socdaalka iyo Jinsiyadda. Sharcigani wuxuu ka mamnuucayaa loo shaqeeyayaasha inay takooraan kuna saleysan heerka dhalashada iyo takoorida asalka qaranka marka ay shaqaaleynayaan, eryayaan, ama shaqaaleynayaan ama u gudbinayaan iyagoo lacag qaadaya. Waxa kale oo ay mamnuucday falalka dukumiintiyada ah iyo aargoosiga ama cabsi galinta. ***Haddii aad u maleynaysid in laguula dhaqmay si aan caddaalad ahayn marka aad isku dayeyso inaad shaqo hesho ama shaqo aad horey u haysatay sababtuna tahay halka aad kasoo jeedo, ama sababta oo ah inaad tahay qof magangalyo-doon ah ama qaxooti ah, Qeybta Xuquuqda Soo-***

## Ilaha Dowladda Federaalka

***galootiga iyo Shaqaalaha ayaa laga yaabaa inay ku caawin karaan.***

**Ilaha ku saabsan takoorka shaqada ee ku saleysan dhalashada ama xaaladda socdaalka**

[justice.gov/crt/immigrant-and-employee-rights-section](https://justice.gov/crt/immigrant-and-employee-rights-section)

800-255-7688 (800-237-2515 (TTY))

### **Maamulka Amniga Bulshada**

Lambarka Amniga Bulshada (loo yaqaano shooshal sekuriti). ayaa loo baahan yahay si loo helo shaqo, loo soo qaato munaafacaadka Lambarka Amniga Bulshada, oo loo codsado adeegyada kale ee dowladda. ***Waxaad u baahan tahay inaad hesho lambarka iyo kaarka Amniga Bulshada. Tag boggan internetka si aad u hesho macluumaad gaar ah oo loogu talagalay qaxootiga iyo magangalyo-doonka.***

[ssa.gov/people/immigrants](https://ssa.gov/people/immigrants)

800-772-1213 (800-325-0778 (TTY))

USCIS waxay iibsatay xuquuqda ay u adeegsaneyso qaar badan oo ka mid ah sawirada ku jira *USCIS Waxay Soo Dhawaynaysaa Qaxootiga iyo Magangalyo-doonka*. USCIS ayaa laysan u heysata inay u isticmaasho sawirradan qaab aan u gaar ahayn lana wareejin karin. Dhamaan xuquuqaha kale ee sawirada, oo ay ku jiraan iyadoon la xadidin iyo xuquuqda daabacida, waxaa lahaan doona milkiilaha sawirada. Sawiradan kuma jiraan qeybta dadweynaha mana loo isticmaali karo marka laga reebo sida ay uga muuqdaan inay qeyb ka yihiin daabicadan.







**U.S. Citizenship  
and Immigration  
Services**

**[uscis.gov](https://uscis.gov)**